



Folkhälsomyndigheten

TILL DIG SOM HAR DAGLIG HJÄLP AV HEMTJÄNST, FEBRUARI 2024, SOMALISKA

## Ku socota adigaaga si maalinle ah caawin uga hela shaqaalaha adeegga guriga

Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha waxay ku talinaysaa in hal talaal oo ka hortagga covid-19 aad qaadato adigaaga ah 65 jir ama ka weyn una baahan daryeel shakhsiyani oo aad ka hesho shaqaalaha adeegga guriga ama wax u dhigma. Tani waa si loo yareeyo khatarta ah in loo baahdo daryeel caafimaad oo dhanka isbitaal ah.

### Is talaal laba goor sanad walba

Dhammaan dadka ah 65 jir ama ka weyn una baahan daryeel shakhsiyani oo ay ka helaan shaqaalaha adeegga guriga ama wax u dhigma waxaa lagula talinayaa in ay iska talaalaan ka hortagga covid-19 laba mar sanad walba, xilliga gu'ga iyo xilliga dayrta labadaba. Adigaaga ah qof baahi u qaba caawinta daryeel shakhsiyani ah maalin walba waxaad khatar sareysa ugu jirtaa in lagu dhigo isbitaal haddii uu kugu dhaco covid-19, marka la barbar dhigo dadka kale. Tani waxay khuseysaa iyadoo aysan sabab u ahayn in aad u baahantahay caawin dhanka gudaha guriga ah.

Talo bixintan waxay khuseysaa xitaa dhammaan dadka ah 80 jir ama ka weyn.

### Difaac ayaad leedahay haddii aad lagaa talaalay isla markaana uu kugu dhacay covid-19

Adigaaga is talaalay xilligii dayrta ee weliba uu ku dhacay covid-19 intii ka dambeysay 1-da Oktoobar waxaad ku xisaabtami kartaa inaad leedahay difaac fiican xitaa inta lagu jiro xilliga gu'ga iyo xagaaga. Markaas adigu ma u baahnid in aad qaadato qayb talaal oo cusub inta lagu jiro xilliga gu'ga, laakiinse waxaad qaybtaada dambe qaadan kartaa xilliga dayrta.